2017-09-28

Somaliska

Macluumaadka ku socda masuulada ku leh carruur dugsiga barbaarinta

Macluumaadka caddaynta qaabka waxbarida dhijitaalka ah ee Degmadda Bollnäs

Dugsiga barbaarinta, koboca ilma kasta iyo waxbarashada waa in xooga la saaraa. Hawlaha waa in laga warhayaa oo si joogta ah loo qoraa, markaas waxaanu baadhi karnaa oo qiimayn karnaa waxa aanu qabanayno. Qiimaynta waxay naga caawisaa hawlaha gaarka ah inay ku habboonaadaan dhammaan koboca suuragalka ah ee ilmaha.

Gudaha dugsiyada barbaarinta Degamdda Bollnäs, tan waxaa loo sameeyaa dhijitaal ahaan, iyaddoo la marayo agabka ku salaynsa IT ee Unikum. Haddii aad tahay masuul, hadda waxaad raaci kartaa hawlaha dugsiga barbaarinta, oo ay la socdaan koboca ilmahaaga iyo waxbarashadda. Shaqaalaha dugsiga barbaarinta waxay isticmaali doonaan Unikum. si ay adiga kuula soo xidhiidhaan (masuulada)

Su’aalaha guud iyo jawaabaha

Maxay tahay Unikum?
Unikum waa madal dhijitaal ah oo leh meelaha (tusaale ahaan) warqaddaha todobaadlaha ah, liisaska cuntadda, jadwalada, qiimaynahayaga iyo kuwa carruurta, aragtiyaha iyo caddaynta maalin ilaa maalin ah ee diiwaanada qaabka bogga bolooga ah ee ka yimid hawlaha dugsiga barbaarinta. Waxaad arki doontaa hawalaha inay ku xidhan yihiin manhajka dugsiga barbaarinta, waxaa loola jeeda, waxa aanu qorshaynayno inaanu ka qabano xaga dugsiga barbaarinta. Waxaad u raaci kartaa ilmahaaga oo waxaad arki kartaa waxa kooxda dugsiga barbaarintu ay qabanayso, dhexda sawirada, caddaynta iyo fikradaha.

Sida caadiga ah, waxaad heli doontaa macluumaadka hadalka ah marka aad keento ama ka qaado ilmahaaga dugsiga barbaarinta. Markaad guriga gaadho, waxaad arki kartaa Unikum, arki kartaa oo akhriyi kartaa sawirada, oo ilmahaagu waxa uu kuu sheegi karaa wax ku saabsan waxaanu samaynay oo kala kullanay gudaha dugsiga muddada maalinta.

Kumaa arki doonaa macluumaadka ku saabsan ilmahayga iyo aniga?

Masuul ahaan,waxaad arki kartaa waxa ay yihiin carruurta kale ee ku jirta kooxda ilmahaaga iyo cidda ay yihiin masuulada ardayda ay isku fasalka yihiin ilmahaaga, waxaad heli kartaa macluumaadka khuseeya kooxda oo dhan.

Adiga oo keliya, masuulka, iyo macalimiinta ka masuula kooxda carruurta ayaa arki kari caddaynta waxbarashadda ilmahaaga iyo koboca dugsiga barbaarinta. Ma jirto wax masuul ah oo geli kara warqaddaha oo ku saabsan ilma kasta oo kale horumarkiisa iyo waxbarashadda.

Macluumaadka caddaynta ku jirta Unikum waxaa keliya loogu talo galay dadka loo oggolaaday. Sidaas awgeed, waa inaanad naqilin, wadaagin ama u isticmaalin sawirada ama caddaynta qaabab kale, sida saxaafada bulshadda sida Facebook ama Instagram.

Macluumaadk si amni ah ma loo kaydiyaa?

Macluumaadka waxaa loogu soo diraa internatka qaab aan la fahmi karin oo qarsoon, sida isticmaalka baanka ee internatka.

Dhammaan masuuladu waa inay isticmaalaan aqoonsiga korontada ah/Aqoonsiga Baanka si ay u soo galaan.

Serferada halka macluumaadka lagu kaydiyo waxay ku yaalaan xarumaha sida wanaagsan looga warhayo ee sida wanaagsan loo ilaaliyo hawlgelida. Nidaamyada waxay shaqaalaha xirfadyaqaanada hawlgalku uga warhayaan saacad kasta, oo macluumaadka si joogta ah ayaa loo xoojiyaa inaanu lumin, Nidaamyada waxaa ilaaliya faayarwoolada.

Sababtee Lambarka Aqoonsiga Gaarka ah (personnummer)loo isticmaalaa?

Amniga- iyo shuruudaha gaar ahaanshaha way sareeyaan, oo taasi waa sababta Lambarka Aqoonsiga Gaarka ah loo isticmaalo, sida ay ku yihiin adeegyada internatka ee bangiyada ama Wakaalada Caymiska Bulshadda, tusaale.
Lambarka Aqoonsiga Gaarka ah hadda waxaa laga isticmaalaa dhammaan dugsiyada barbaarinta wadama si loo aqoonsado ardayda kuwaas oo soo xaadira dugsi barbaarin oo kasta iyo dugsiga, iyo sidoo kale in loo aqoonsado.
masuulada si sax ah. Lambarka Aqoonsiga Gaarka ah waxaa looga baahanyahay si loo hubiyo in macluumaadka ilmahaagu uu ku xidhanyahay masuulka saxda ah.

Maadaama macluumaadka ku jira uu ka koobnaan doona macluumaad gaar ah, Degmadda Bollnäs waa inay u hogaansantaa Xeerka Xogta Gaarka ah (PDA), iyo si degdeg ah Xeerka Ilaalinta Xogta siiba.

Intee in leeg ayaa macluumaadka caddaymaha ku saabsan ilmahayga la kaydiyaa?

Macluumaadka caddaynta ilmahaaga waxaa la hayn doonaa muddada wakhtiga ilmahaagu ku jiro dugsiga barbaarinta. Haddii uu ilmahaagu beddelo dugsiyada barbaarinta gudaha
Degmadda, macluumaadka caddaynta ilmahaagu way la socon doontaa isaga/iyadda.

Oggolaansho ma loo baahanyahay?

Sababtoo ah Unikum waa agabka Degmadda Bollnäs ay u dooratay qoritaanka waxbarashada dhammaan carruurta dugsiga barbaarinta, oggolaanshahaaga (masuulada) loogama baahna tan. Waxaanu isticmaalnaa qalab dhijitaal ah hadda beddelka warqadda iyo qalimada.

Macalimiintu waxay ku dari doonaan sawirada carruurtaada caddaymaha ilmahaagu iska leeyahay. Si kastaba ha ahaatee, haddii ay jecelyihiin sawirada in lagu daro ilmaha macluumaadka caddaynka kooxda ee dugsiga barbaarinta, kaas oo dhammaan masuulada kooxda ay arki karaan, waa inaad bixisaa oggolaanshahaaga. Waxaad tan kula samayn kartaa shaqaalaha dugsiga barbaarinta foomka codka, filimka iyo sawirada saxaafada bulshada, internatka iyo macluumaadka daabacan.

Waa muhiim in la ogaado

Dhokumentiga Dad waynaha
Caddaymaha qaabka waxbarida waa dhokumenti dad wayne. Sida waafaqsan maamulaha gelitaanka dad waynaha ee dhokumentiga rasmiga ah, waa suuragal in la codsado dhokumenta yaala Degmadda, Haddii uu qof codsado macluumaadka caddaynta waxbarida, dib u eegid qarsoodi ah ayaa la sameeyaa, halka macluumaadka xasaasiga ah, haddii ay wax uun jiraan, la tirtiro, ka hor macluumaad caddayn kasta inta aan la gudbin.

Macluumaadka xasaasiga ah

Macluumaadka caddaynta qaabka waxbarida waxaa qora shaqaalaha dugsiga barbaarinta. Waxa ku qoran caddaynta waa inaanay ka koobnaan macluumaad xasaasi ah.

Dareenka iyo hab dhaqanka - macluumaadka muhiimka ah ee qaybaha qoraalka xorta ah!

Macluumaadka caddaynta dhijitaalka ah waxay ka koobnaan karaa qaybaha qoraalka xorta ah. Qaybaha qoraalka xorta ah waa inaanay ka koobnaan sharaxaada ama qiimaynaha sifooyinka gaarka ah ee qofka. Warbixinaha weerarka ah lama oggolo, midna. Tani waxay ku habboontahay qof kasta oo isticmaala Unikum ama agabyada kale ee dhijitaalka ah ee shaqo.

Macluumaadka kale

Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo dheeraad ah oo ku saabsan macluumaadka caddaynta qaabka waxbarida, waxaad kala xidhiidhi kartaa shaqaalaha ama maamulaha dugsiga barbaarinta ilmahaaga.

Hadda bilow!

Waxaad ka soo geli kartaa Unikum mid uun kombuyuutarkaaga ama abka telefoonada casriga ah iyo taableedada.

Booqo cinwaanka https://start.unikum.net/ ama ku soo dejiso abka Unikum telefoonkaaga casriga ah ama taableedka, Markaas halkaas joogto, dooro'U gal qaab kale' (*Andra sätt att logga in*), ka dibna Degmadda 'Bollnäs (*Bollnäs kommun*). Kadib, soo gala adoo isticmaalaya BankID ama Mobile BankID. Marka macalimiinta dugsigaaga kooxda barbaarinta ay soo geliyaan shay kasta oo ku saabsan adiga waalid ahaan ama ilmahaaga, waxaad ku heli doontaa wargelinta tan abka.

Bogga www.unikum.net , waxaad ka akhriyi kartaa waxbadan oo ku saabsan tan, arag filimada macluumaadka leh, oo akhri faallooyinka ku saabsan agabkan oo ka yimid masuulada xaga dugsiga barbaarinta.

Waxaad ka heli kartaa macluumaadka taageerada, macluumaadka filimada iyo wax badan websaydkayaga:
http://www.bollnas.se/index.php/unikum

Waxaanu rajaynaynaa muddo waxbarideed addoo isticmaalaya agabkan cusub!